

Adeeggo IskuFilan

myBank
Wherever you go

UJEEDKA ADEEGGA ISKUFILAN:

Adeegga ISKUFILAN waxa uu haweenka Soomaaliyeed u fududeynayaa helitaanka maalgelin ku habboon baahiyahooda, iyaga oo dahabkooda u adeegsanaya dammaanad, ay kaga maarmi doonaan dammiin shaqsiyeed iyo Taskiyo labadaba.

Adeeggu waxa uu haweenka siinayaa fursad ay dahabkooda uga faa'iidaystaan iyagoon iibin, si ay u kobciyaan ganacsiyadooda, u helaan maalgelin, una daboolaan baahiyaha muhiimka ah sida waxbarashada, caafimaadka iyo nolosha qoyska.

ISKUFILAN waxa ay sidoo kale gacan ka geysaneysaas ballaarinta helitaanka adeegyada maaliyadeed, dhiirrigelinta shaqo-abuurka iyo xoojinta dhaqaalaha haweenka Soomaaliyeed.

FAA'IIDOOYINKA ADEEGGA ISKUFILAN

- Helitaan maalgelin fudud: Haweenku waxa ay maalgelin ku heli karaan dahabkooda, iyagoo raacaya shuruudaha iyo habraacyada maalgelinta ee MyBank.

- Ka maaranka hanti dammaanad ah: Macmiilku uma baahna inuu keeno guri, dhul ama hanti kale oo leh dukumenti lahaansho si uu maalgelin u codsado.

- Ka maaranka dammiin shaqsiyeed: Adeeggu wuxuu xallinayaa caqabadaha ka dhasha helitaanka qof dammiin ka noqda macmiilka marka ay maalgelin codsanayso.

- Ka faa'iidaysiga dahabka iyada oo aan la iibin: Dahabka waxaa loo adeegsanayaa dammaanad lagu helo maalgelin, iyada oo macmiilku sii haysanayo lahaanshihiisa.

- Dib u helidda dahabka: Marka maalgelinta iyo waajibaadka la xiriira si buuxda loo bixiyo, dahabka waxaa dib loogu celinayaa macmiilka.

- Kobcinta ganacsiga: Maalgelinta waxaa loo adeegsan karaa ballaarinta ganacsiga, kordhinta raasamaalka, iibsashada agabka iyo horumarinta hawlaha ganacsi.
- Abuurista fursado dakhli: Adeeggu wuxuu haweenka ka caawinayaa in ay bilaabaan ama horumariyaan hawlo dhaqaale oo u abuuri kara dakhli joogto ah.
- Daboolidda baahiyaha muhiimka ah: Maalgelinta waxaa looga faa'iidaysan karaa waxbarashada, caafimaadka iyo baahiyaha kale ee muhiimka u ah macmiilka iyo qoyskeeda.
- Kaydinta dahabka oo ammaan ah: Dahabka waxaa lagu keydinayaa meel ammaan ah.

SHURUUDAHA ADEEGGA ISKUFILAN:

1. Aqoonsi dowladeed oo ansax ah: Macmiilku waa inuu keenaa National ID (Kaarka Aqoonsiga Qaranka) ama Passport (Baasaboor) ansax ah.
2. Dahab buuxinaya shuruudaha: Dahabku waa inuu yahay 21, 22 ama 24 kirat
3. Qiimeynta dahabka: Dahabka waxaa laga xaqiijinayaa saafinnimadiisa, miisaankiisa iyo qiimihiisa suuqa.
4. Qiimeynta awoodda wax-bixinta: Macmiilka waxaa lagu sameynayaa qiimeyn lagu xaqiijinayo awoodda uu u leeyahay dib-u-bixinta maalgelinta.
5. U hoggaansanaanta shuruucda: Macmiilku waa inuu buuxiyaa shuruudaha deynta, u hoggaansanaanta shuruucda iyo qiimeynta khataraha ee MyBank.
6. Oggolaanshaha shuruudaha maalgelinta: Macmiilku waa inuu akhriyaa, fahmaa oo aqbalaa heshiiska iyo shuruudaha adeegga.
7. Kaydinta dahabka: Macmiilku waa inuu oggolaadaa in dahabka lagu kaydiyo khasnadda amniga sare leh ee bangiga inta maalgelintu socoto.
8. Dib-u-bixinta waqtigeeda: Macmiilku waa inuu lacagaha ku bixiyaa jadwalka dib-u-bixinta ee lagu heshiiyey.



7777 +252 1 847777 | +252 62 3737777

+252 61 3737777

info@ mybank.so

www.mybank.so

MyBankLTD

MyBankLTD

Head Office / Branch Location
Mogadishu, Somalia